

Kooxda Jawaabta Dhibaatada Mobeelka (MCRT)

Caawin U hel Alkulada, Daroogada, ama Dhibaatada Caafimaadka Maskaxda



Barnaamjika Kooxda Jawaabta Dhibaatada Mobeelka (MCRT) waxay siiyaan taageerada mobeelka oo 24/7 isbuucii dadka la kulmayo dhibaatada caafimaadka damiirka iyo isticmaalka maandooriyaha la xiriiro halkaasoo ay yihiin, markii ay u baahdaan.

Laga heli karo wadankoo dhan iyo dadka da' walba ah, MCRT waa badelka jawaabta fullinta sharciga iyo kooxaha ka kooban taqasusyada caafimaadka dabeeecada kuwaasoo u tababaran inay ka jawaabaan dhibaatada bulshada dhexdeeda oo ay dajiyaa dhibaatada la xiriirto alkulada, daroogada, ama xaaladaha caafimaadka damiirka.

Sidee ayay MCRT kuu caawin kartaa?

MCRT ayaa ka jawaabi karto wacitaanada dhibaatada caafimaadka dabeeecada oo aan ku luglaheyn xaaladaha degdega caafimaad, hubka, ama halisaha la garanayo ee rabshada. MCRT ayaa ku caawin karto:

- Xasilinta dhibaatada iyagoo u marayo waxqabadka iyo xasilinta
- Bixiso gaadiid adeegyada caafimaadka kale ee dabeeecada sida loogu baahanyayah
- Kugu xirto illaha bulshada iyo daaweynta
- Xiriiriso adeegyada daaweynta hore oo illaa 30 maalmood



Bixiyayaasha Kooxda Jawaabta Dhibaatada Mobeelka Gobolka



*Ka kormeer Warbixin
Badan oo ku saabsan
MCRT*

Sidee ayaan u heli karaa MCRT?

MCRT waxay ka howlgashaa dhinaca wacitaanada lagu sameeyo [San Diego Access and Crisis Line \(ACL\)](#) **(888-724-7240)** ama adeegyada xaalada degdega ah. Xiriiriyeyaa tababaran ayaa ka qiimeynayo xaalada halista iyo badqabka iyagoo u marayo su'aalo taxane oo iyaga ayaa go'aaminayo haddii MCRT ama waxqabad kaloo dhibaatada ah ama adeega jawaabta ah in la diro.

Haddii MCRT ay ka howlgasho, koox ayaa imaaneyso goobta la codsaday oo gaari ku calaameysan "MCRT". Koox ay ka mid yihiin dhaqtarka caafimaadka damiirka shatiyeysan, maareeyaha dacwada, iyo taqasuska taageerada faca ayaa kula hadlayo oo go'aansanayo sida wanaagsan oo laguu caawiyo iyo laguugu xiro illaha ku haboon.



Wacitaanka bulshada
waxaa helo ACL ama
adeegyada gurmadka



Waxaa baaro ACL ama
xiriiriyaha adeegyada
xaalada degdega ah



Kooxda jawaabta
ku haboon waa
xiriiriyeye

Haddii aadan hubin waxa la sameeyo ama waxa aad u baahantahay, soo wac ACL si aad ula hadashid la taliye waaya arag ah. Wixii warbixin dheeraad ah oo ku saabsan MCRT oo ay ku jiraan **Su'aalaha Badanaa La is weydiyo**, booqo www.sandiegocounty.gov/mCRT.

11/8/24

Ku xirnaanta Illaha

Soo wac 888-724-7240 si aad ugu xirantid
San Diego Access and Crisis Line si bilaash ah
iyo taageerada qarsoodiga ah iyo caawinta socodka
adeegyada, oo lagu heli karo 24/7 in ka badan 200
luuqadood.

Soo wac 988 si aad ugu xirantid **Qadka nolosha Isdilka iyo Dhibaatada ee**
xarumaha wacitaanka shabakada dhibaatada.